



*Marka ilmahaagu jirranyahay*

## Ka kooban

Bogga

|   |          |
|---|----------|
| <i>Infekshannada caruurta dugsiga</i>       |          |
| <i>xannaanada</i>                           | <b>4</b> |
| Infekshannada caruurta iyo difaaca          | 4        |
| Antibayootik                                | 4        |
| Yaree faafinta cudurka ee dugsiga xannanada | 4        |
| <i>Talo dhinaca infekshannada</i>           | <b>5</b> |
| Xummad                                      | 5        |
| Xanuunka shanaad                            | 5        |
| Hargeb – diif, qufac, cuno-xanuun           | 5        |
| Xanuunka qumanka iyo bakteeriyada keenta    | 6        |
| Injir                                       | 7        |
| Xanuunka gacanta, cagta iyo afka            | 7        |
| Imbetiigo – svinkoppor                      | 7        |
| Calool xanuunka                             | 8        |
| Mollusker                                   | 8        |
| Jadeeco                                     | 9        |
| Dhuun xanuunka xummad badan                 | 9        |
| Is-nidaamis                                 | 9        |
| Gooryaanka                                  | 10       |
| Busbus/hablabaas                            | 10       |
| Indho xanuun                                | 11       |
| Indho xanuun iyo dhego xanuun               | 11       |

Buugan yar wuxuu bixinaya warbixin ku aadan waalidka leh caruur ah da'da dugsiga xannaana-da wuxuuna ku saabsanyahay xanuunada caadiga ah ee ku dhici kara ilmaha iyo goorma aya il-muhu awoodi karaa inuu joogo dugsiga xannaanada ama ay tahay inuu joogo guriga. Buugan yar wuxuu ku salaysanyahay warbixinta kooban ee Maamulka dhexe ee arrimaha bulshada ee cudur faafinta dugsiga xannaanada waxaana lagu soo qaatawada-shaqayn u dhaxaysa Qaybta difaaca cudur faafinta ee Skåne, Xarunta aqoonta ee daryeelka caafimaadka caruurga iyo dhakhtarka sare ee caruurga Percy Nilsson, Cisbitalka caruurga Malmö.

## Talo bixin

Talo bixinta daryeelka caafimaadka, lehna telafoon lambar 1177 waxay awooda bixinta ta-looyinka ku saabsan xanuunada oo ah maalin iyo habeenba. Boggooda internetka ([www.1177.se](http://www.1177.se)) waxa ku jira wax dheeraad ah oo la akhristo. Ka dhex raadi daaqadda raadinta Infektioner hos barn- smittguide boggaga mawduu Barn och föraldrar. Waxa kale oo shaqaynaysa in lala xidhiidho rugta caafimaadka ama runta xannanada caruurga ee ilmuuhu ku qoranyahay si loo helo talo ama loo ballansado booqasho.

### Sharraxic erey oo ku saabsan cudur faafinta

**Cudur faafin** – fidinta walax cudur la isku daarto, tusaale ahaan faayras ama bakteeriya

**Infekshan** – xanuun uu sababay walax faafa oo leh laga bilaabo dhib fudud ilaa xanuun aad u dhib badan

**Side** – in la sido walax faafa iyadoo aan la jirranayn

**Faayras** – walax faafa oo aan la awoodin ku daweynta antibayootik

**Bakteeriya** – walax faafa oo la awoodo ku daweynta abtibayootik

**Adkeysi antibayootik** – bakteeriya si xoogan u diida antibayootik

**Wakhtiga inkubeeshanka** – wakhtiga uu qofku xanuunka qaaday laga bilaabo ilaa inta uu soo shaacbayxayo

**Difaacid** – xanuun ku dhicid ka dib ama ka tallaalnaan ma ku dhaco xanuunku qofka mar kale xitaa haddii uu khatar ugu jiro xanuunka.

# *Infekshannada caruurta dugsiga xannanada*

## **Infekshannada caruurta iyo difaaca**

Infekshannada waa ku caadi caruurta. La jaanqaadka in difaacu uu horumarayo waxay keentaa in infekshannadu u bogsadaan si fudud iyo in tirada infekshannadu yaraato. 90% infekshannada caruurta waxa sababa faayras, hargeb ayaa ugu badan. Caruurta aadka u yar ee dugsiga xannanada waxa ku dhaca 6-12 hargeb sannadkiiba halka caruurta yara weyn ee dugsiga xannanada ay ku dhacaan 4-6 hargeb sannadkiiba. Caruurtu xitaa waxay leeyihiin bakteeriya dhinaca hawo mareenada ah. Intooda badan waa kuwa waxtar leh oo waxay bixiyaan difaac ka hor taga infekshannada dhibka badan. Infekshannada iyo sideha bakteeriyyadu waxay kaalmeeyaan in la dhiso difaaca ilmaha gaarka u ah.

Caruurta si kala duwan ayay uga facil-celiyaan infekshannada. Qeyb ka mid ah caruurta ma ku dhacaan qiyasti wax dhib ah oo ka timi infekshan halka caruur kalena ay ku dhacdo xummad sare oo laga dareemo xannuun. Mararka qaarkood ilmuu wuxuu u baahanyahay nasasho guriga oo maalin ah si uu u noqdo mid leh firfircooni ku filan oo uu ku awoodo ka qayb-qaa-dashada hawlaha caadiga ee dugsiga xannanada.

## **Antibayootik**

Antibayootikada mararka qaarkood waa loo baahanyahay marka la daweynayo infekshannada bakteeriyyadu laakiin waa in aan la isticmaalin haddii aan loo baahnayn. Isla markiiba ka dib daaweyn antibayootik ilmuu si dheeraad ah ayuu ugu nugulyahay infekshanno maadaama xitaa bakteeriyyadi waxtarka lahayd ay meeshi ka baxday iyo iyadoo markaasi uu sii xumaaday difaaca jidhka ee ka hortaga infekshanno cusub. Bakteeriyyadu waxa intaas sii dheer oo ay awoodaan inay noqdaan kuwo u adkeysi/awood ka hortaga kaga hortaga antibayootikadi oo noqota mid aan natijjo lahayn. **Antibayootikadu mal aha waxtarid dhinaca faayraska.**

## **Yaree faafinta cudurka ee dugsiga xannanada**

Cudur faafin badan waxay ku faafsta dhinaca gacmaha. Sidaa darteed Mid ka mid ah qaababka ugu wanaagsan ee yareynta faafinta cudurka waaa in badanaaba la dhaqo gacmaha. Way wanaagsantahay in la baro ilmaha ku qufaca iyo ku hindhishka cududa oo laaban. Xitaa hawlaha banaanka waxay yareeyaan khartarta cudur faafinta. Joogitaanka bannaanka waxay keenaysaa cidhiidhi sii yar iyo xanuun faafid sii yar. Si loo yareeyo faafin cudur waxa ay mararka qaarkood muhiim noqon kartaa in ilmuu joogo guriga.

# *Talo dhinaca infekshannada*

## **Xummad**

Caruurta waxay leeyihiin xummad haddii heerkulku ka sareeo 28 darajo oo aroorti ah ama ka dib saacad badhkeed oo nasasho ah. Caruurta inay xummad helaan way fududahay, gaar ahaan xilliga infekshannada faayraska. Xummadu maaha khatar balse waa qeyb ka mid ah difaaca jidhka ee ka hortaga infekshannada.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** U firso sida ilmuu dareemayo una oggolow ilmuu inuu go'aansado inta uu awoodo inuu soo jeedo. U oggolow ilmaha inuu marar badan wax caboo. Tani waxaa la isticmaali karaa hadddii ilmaha laga arki karo inuu u xanuusanayo xummad, tusaale ahaan lahaanshaha xanuun jidhka ah, cabasho badan, cunto iyo cabitaan liidata, hurdo xummo ama ay ku adagtahay inuu degganaansho helo fidki. La xidhiidh daryeelka caafimaadka haddii ilmuu uu tabar daranyahay, aanu doonayn cabitaan, u muuqdo mid qortu adagtahay, leeyahay xummad kogid ama leeyahay heerkul dhaafsan 41 darajo.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmo leh xummad maaha inuu joogo dugsiga xannaanada. Caruurta si kala duwan ayay raad ugu yeelataa xummadu laakiin waxa caado wanaagsan ah in ilmaha loo oggolaado helitaanka joogis guriga ah ilaa uu hal maalin noqonayo bilaa xummad.

## **Xanuunka shanaad**

Xanuunka shanaad wuxuu ku bilaabmaa daal, xanuun jidhkhya ah iyo xummad. Dhown maalmood ka dibna dhabannada ayaa casaanaya iyadoo jidhkhana lagu arko firiiric/finan khafif ah oo dhibco leh. Firiiric/finanka ayaa iman kara soona noqon kara muddo 1-2 toddobaad ah. Qaar ka mid ah caruurta ma ku dhacdo wax dhib ahi. Xanuunka shanaad waa xanuun faayras oo fudud ahna mid caadi ah xilliga jiilaalka iyo gu'ga. Wakhtiga inkubeeshanka waa 1-3 toddobaad. Faafinta xanuunka waxay dhici kartaa ka hor intaan la arkin firiiraca/finanka. Xanuunka ka dib ilmuu wuxu noqdaa mid aan qaadi karin mar kale.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Xummad yareeyaha iyo xanuun yareeyaha way awoodaan yaraynta xanuunka (eeg sadarka kor). La xidhiidhka daryeelka caafimaadka naadir ayaa loo baahdaa.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa inuu joogo guriga ilaa iyo inta uu ahaanayo mid bilaa xummad ah oo awooda ka qayb-qaadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannaanada.

## **Hargeb – diif, qufac, cuno-xanuun**

Calaamadaha caadiga ee dhanka hargebka waa diif, qufac iyo cuno-xanuun. Tani waa infekshanka faayras ee ugu badan caruurta. Xilliga sannadaha dugsiga xannaanada waxa lagu xisaabtamaa 4-12 hargeb sannadkiiba. Ilmaba kuu kas ii yaryahay wuu kas ii hargeb badanyahay. Hargebku wuxuu soconayaa 1-2 toddobaad waana caadiyan xilliga jiilaalka. Inta lagu jiro wakhtiyadaas waxa dhici karta in ilmaha loo arko mid si joogto ah u xanuusan. Ilmuu waa mid faafin kara ilaa maalin ka hor intaan xanuunku ku dilaaacin iyo weliba maalmaaha ugu horeeya ee xanuunka. Faayrasku wuxu ku faafaa qufaca iyo hindhisada isla markaana candhuufta iyo diifka ku yaala gacmaha. Khatarta faafinta way yaraataa haddii la dhaqo gacmaha isla markaana lagu hindhisoo cududa oo laaban. Wakhtiga inkubeeshanka caadiyan waa 1-3 maalmood.

## **Diif**

Diifku bilowga hore waa bijobiyo waana mid cad oo wax laga dhix arki karo. Waa caadi in diifku noqdo mid qaroweyn oo ah hurdi ama cagaar. Diifku caadiyan wuxu ku joogsadaa 1-2 toddobaad. Ilmuu ma u baahna in lagu daweeyo antibayootik ama guri ka joogista dugsiga xannaanada oo loo sababeeynayo in diifku yahay hurdi ama cagaar.

## **Qufac**

Badanaaba wuxu ku bilaabmaa qufac qallalan oo ka dibna noqda mid xaako badan. Mararka qaarkood waa xanuu xoqaya xagga dambe ee laabta. Qufacu waa dhaq-dhaqaaq difaac ah oo iskii isaga yimaadda waana mid caawisa in ay neef-mareenadu ka sisaysnaadaan xakkada. Sidaa daraadeedna maaha in la yareeyo iyadoo taas aan baahi loo qabin. Qufacu wuxu socon karaa 2-4 toddobaad taas oo ah wakhti ka dheer ka diifka. Qufacu wuu sii xumaadaa haddii ilmuu ordayo ama buuqay.

## **Cuno xanuun**

Cuno xanuun/xanuunka qumanka waxa sababi kara faayras iyo bakteeriya labadaba. Qanjyasha qoorta ee ku yaala xagga dambe ee ee qoorta ayaa barara waxayna noqdaan casaan leh dhibco/dahaadh cadaan ah. Waxaa xanuun keenta in wax la liqo waanay dhici kartaa in ay adkaato in wax la cuno ama la cabbo. Mararka qaarkood waxa ilmaha ku dhacda xummadi. Xanuunka qumanka ee faayraska waa mid caadi ah dhinaca caruurga dugsiga xannaanada waxaan markaasi ilmuu badanaaba isla marahaantaa leeyahay diif ama qufac.

**Is-daryeelib/daryeel caafimaad:** Ku yaree cabudhka sanka iyadoo kor loo qaadayo sariirta madaxeeda iyo sanka oo lagu shubo dhibcaha biyo cusbo leh oo lagu qasay biyo fardiiro ah. Marka cabudhka sanku xunyahay waxaa la isticmaali karaa dhibcaha sanka ama buuufiska sanka. Xaakadu waxay noqtaa mid fudud in la soo qufaco haddii ilmuu si fican wax u cabbo. Dwoooyinka xummadi yareeyaha/xanuun yareeyaha waa la siin karaa mararka qaarkood (akhri Xummadi, bogga 5). La xidhiidh daryeelibka haddii ilmuu daalanyahay oo leeyahay qufac socda in ka badan laba toddobaad. Si toos ah ula xidhiidh daryeelibka haddii ilmuu tabar daranyahay oo ay ku dhacdo neefsasho ah degdeg ah oo gaaban ama leeyahay cuno xanuun aad ah oo keena in aanay suurtagal ahayn in la liqo candhuufta.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa in uu guriga joogaa ilaa inta uu bilaa xummadi ahaanayo oo awoodayo ka qayb-qaadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannaanada.

## **Xanuunka qumanka iyo bakteeriyyada keenta**

Bakteeriyyada quman xanuunka waxay keentaa xummadi iyo cuno-xanuun. Qanjidhada qoorta ayaa barara, casaada oo mararka qaarkoodna waxa ku dhaca dhibco cadaan ah. Waxay faafaa ilaa inta ilmuu xanuusanayo. Waxay ku faaftaa dhibcaha candhuufta. Wakhtiga inkubeeshan-ku waa 2-4 maalmood. Bakteeriyyadu xitaa waxay keentaa imabetiigo/svinkoppo, infekshano nabaraysan iyo infekshano cadka u dhaxeeya ciddiyaha iyo maqaarka.

Xanuunka qumanka waxa kale oo sababi kara faayraska hargeebka. Markaasi ilmuu wuxuu leeyahay xitaa dhibaatooyin kale sida diif ama qufac. Faayraska xanuunka qumanka ma lagu daaweyn karo antibayootik.

**Is-daryeelib/daryeel caafimaad:** Xanuunka qumanka waxa uu ku bogsan karaa iskii ilaa hal toddobaad. Waxaa lagu khafiifin karaa cabitaan ah qabow ama diiran. Xummadi yareeyaha iyo xanuun yareeyaha way awoodaan yaraynta xanuunka (eeg Xummadi, bogga 5). Haddii xummadi hoos u degi waydo afar maalmood waxa loo baahan karaa antibayootik. Qiimeyn ta waxa

lagu samaynayaan rugta caacimaadka waxaana la qaadayaa baadhitaan cunaha ah si loo kala saaro inay tahay bakteeriyyada quman xanuunka ama faayraska quman xanuunka. Toos ula xidhiidh daryeelka haddii ilmuu leeyahay cuno-xanuun badan oo keenay in ay adagtahay liqidda candhuuuta.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa inuu guriga joogo ilaa inta uu leeyahay cuno-xanuun iyo xummadi. Haddii ilmaha antibayootiga la siinayo waa in daaweyntu socotay ugu yaraan laba maalmood ka hor ku noqoshada dugsiga xannanada. Ilmaha waa inuu awoodo ka qayb-qadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannanada.

### Injir

Injirtu waxay ku jirtaa tinta iyo maqaarka madaxa oo badanaa keentaa cuncun. Cid kastaa way geli kartaa injirtu. Iyagu way ka heshaa timo markaa la dhaqay iyo mid aan la dhaqinba. Faafintu waxay dhacdaa is-taabashada dhow madax iyo madax ee hal miridh ama ka badan.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Mar mar dhifa bay ku faaftaa sii marid alaab maadaama injirtu ay wixi ka baxsan maqaarka madaxa ku noolaan karto maalin keliya. Saliida udgoon ee timaha la mariyaa waxay keentaa in si fudud loo arko injirta. Baaritaan ku samee dhamaan qoyska. La xidhiidhka daryeelka caafimaadka dhif ayaa loo baahdaa.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Bilaabitaanka daaweynta ka dib ilmuu wuxu dib u tegi karaa dugsiga xannanada. Si looga hortago sii socodka faafinta injirta waa muhiim in la wargeliyo dugsiga xannanada si caruurta kale iyo shaqaalaha looga baadhi karo injir.

### Xanuunka gacanta, cagta iyo afka


Xanuunka gacanta, cagta iyo afka wuxu keenaan xummadi iyo bararyo afka ah kuwaas oo keeni kara nabaro xanuun leh iyo finan ku yaala baabacada gacmaha iyo cagta xaggeeda hoose. Qaar ka mid ah caruurta ma ku dhacdo haba yaraatee wax dhib ahi. Infekshanku wuxuu iskiis ku tagaa 7-10 maalmood. Xanuunka gacanta, cagta iyo afka waa xanuun faayras ah kaas oo caadi ah xilliga dambe ee xagaaga iyo deyrta. Xitaa waxa lagu magacaabaa cudurka gacanta- cagta- iyo afka. Wakhtiga inkubeeshanka waa 3-7 maalmood. Wuxu ugu faafid badanyahay maalmaha ugu horeeya gudahooda. Xanuunka ka dib ilmuu wuxu noqdaa mid aan qaadi karin mar kale.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Xanuunka afka wuxu ahaan karaa mid dhib badan leh. Cabitaan qabow iyo jallaato ayaa khafifin karta. Dwoooyinka xanuun-yareeyaha ee aan u baahnayn warqad dhakhtar waa haddii loo baahdo. La xidhiidhka daryeelka caafimaadka dhif ayaa loo baahdaa.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa in uu guriga joogaa ilaa inta uu bilaa xummadi ahaanayo oo awoodayo ka qayb-qadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannanada.

### Imbetiigo – svinkoppor

Imbetiigo waa infekshan maqaarka ah. Waxay ku bilaabantaan nabaro yar oo ay ka buuxaan dheecaan kuwaas oo waynaada, dilaaca ka dibna yeesha qolof huruudi ah oo casaan ka ah hareeraha. Finanku badanaba waxay ku yaalaan hareeraha sanka iyo afka laakiin waxay ka dhici karaan xitaa qaybo kale oo jidhka ah. Imbetiigo waxa sababa



baakteeriyada istrebtokoker ama istafiyilokoker kuwaas oo aad u faafa. Caadiyan waxay ku bogsadaan hal toddobaad. Wakhtiga inkubeeshanku waa 2-3 maalmood.-

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Waxay si dhakhso ah u bogsadaan haddii la dhaqo qolofta. Ku jilci qolofta maro qoyan ka dibna ku dhaq saabuun iyo biyo. Ka dib gacmaha si fiican u dhaq. Ku hubso in ilmuu badanaaba dhaqo gacmaha iyo inaanu xooqin ama taaban nabarka. Gogosha sariirta iyo waxa caruurtu ku ciyaarto ee dhogorta leh waa loo baahan karaa in la dhaqo. La xidhiidh daryeelka caafimaadka haddii ay samaysmaan nabaro waaweyn, haddii finanku ku fafaan jidhka ama aanay ku tegin hal toddobaad.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa inuu joogo guriga ilaa inta dheecaanka finanku ku joogsanayaan oo ay si dhammaystiran ugu qalalaan. Haddii ilmaha la siyo antibayootik waa in daaweyntu socotay ugu yaraan laba maalmood isla markaana finanku ahaadaan kuwa qallalan ka hor ku noqoshada dugsiga xannaanada.

### **Calool xanuunka**

Faayraska calool xanuunka waa mid si aad ah u faafa, ka ugu badan waa faayraska "rota" iyo faayraska mataga ee jiilaalka. Badanaa bilowgu waa matag iyo/ama shuban degdeg ah. Mararka qaarkood ilmuu wuxu xitaa leeyahay xummad iyo caloosha oo xanuunaysa. Matagu wuxuu badanaa ku istaagaan hal maalin halka shubankuna sii socdo dhowr maalmood. Wakhtiga inkubeeshanku caadi ahaan waa 1-3 maalmood.

Calool xanuunka waxa kale oo sababi kara bakteeriyada loo yaqaan "salmonella" "campylobakter" ama "EHEC". Si gaar ah caadi ahaan u tahay inta lagu jiro xilliga xagaaga. Ilmaha waxa ku dhaca shuban iyo mararka qaarkood xitaa matag, xummad iyo xanuun caloosha ah. Baaritaanka iyo dhiig qaadista waxa lagu sameeya rugta caafimaadka. Xanuunka ilmuu hadduu la xiriiro safar dalalka dibedda ah ama hal toddobaad ka dib ku soo noqoshada waddanka waa in lala xidhiidho daryeelka caafimaadka. Ilmuu waa in laga qaado saxaro oo uu joogo guriga ilaa iyo inta jawaabta baaritaanku dhamaanayso.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Cabitaan aad u badan, ha ahaado qaybo badan iyo marar badan. Dareeraha fuuq celinta waa la iibsan karaa ama qof ahaantaada ayaa qasaya (1 litir biyo lagu daray qaaddada shaaha nuskeed oo cusbo ah iyo labo qaaddada cuntada ah oo sonkor ah iyo hadday suurto gal tahay ku dar wax u yeelaya dhadhan). La xidhiidh daryeelka caafimaadka haddii uu yimaado matag ama shuban dhiig leh, calool xanuun dhib badan ama ilmuu muujiyo calaamadaha fuuqbaxa, yahay mid daal ka muuqdo oo ah mid xanuunsan oo kaadinaya wax aad u yar ama mar mar dhif ah.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa inuu joogo guriga ugu yaraan hal, badanaaba labo, maalmood oo kadib matagi/shubanku ugu dambeeyay. Marka fayras calool xanuun oo baahsan oo aan joogsan uu ka dhaco dugsiga xannaanada xitaa walaalahu waxay u baahan karaan inay joogaan guriga.


### **Mollusker**

Mollusker maaha khatar waana buurbuuri yar oo u eeg maqaarka oo dhexda ku leh god yar. Caadi ahaan ma keenaan wax dhib ah. Waxay qaadaan kartaa laba bilood ilaa labo sano inta ay ku baab'ayaan. Wuxuu sababa faayras, heerka faafintuna waa dhexdhexaad. La xidhiidhka daryeelka caafimaadka dhif ayaa loo baahdaa.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu wuu joogi karaa dugsiga xannaanada oo ka qayb-qaadan karaa dhamaan hawlaha.

## Jadeeco

Jadeecadu waxay ku bilaabtaha xummad sare, qufac qallalan iyo cuncun indhaha ah. Maalmo kadib waxa laarkaa finan ka bilaabma wejiga oo ku faafa jidhka. Ilmuu si weyn ayuu u bukoodaa. Wakhtiga inkubeeshanku waa 10-14 maalmood. Faayraska jadeecadu aad ayuu u faafaa. Qaraxeedu wuxu ka dhacaadu aduunka oo dhan.



Tallaalka ka hortaga jadeecadu wuxu ku jiraa tallaalada caruurtta. Ilmo la tallaalya ma ku dhaco mana u xanuusado. Qofkii ay la soo daristo faafitaankeedu ee aanu ku soo dhicin xanuunkan ama aan ka tallaalnay waxa la awoodaa in xanuunka laga hortago haddii tallaabooyin ka hortaga la qaado wakhti fican.

**Is-daryeelib/daryeel caafimaad:** Dwoooyinka xummad yareeyaha/xanuun yareeyaha way khafiifin karaan (eeg Xummad, bogga 5). Had iyo jeer la xidhiidhka daryeelib kaafimaadka laakiin marka hore telafoon u dir si aad u hesho daryeelib sax ah.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa inuu guriga joogo ilaa inta xummada iyo finanku tagayaan ee uu awoodayo ka qayb-qaadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannaanada.

## Dhuun xanuunka xummad badan

Dhuun xanuunku wuxu keenaa xummad iyo cuno-xanuun. Qanjidhadayasha cunahu waxay noqdaan kuwa bararsan oo casaan ah oo leh dhibco cadaan ah sida cuno-xanuunka. Mararka qaarkood carrabku wuxux noqdaa casaan leh daahaadl (carrab aad u cas). Finanka jidhku waa waa dhibco yar-yar oo ah buurbuur yar. Dhowr toddobaad ka dib waxa duuduubmi kara maqaarku baabacooyinka iyo cagta xaggeeda hoose. Waxa sababa baakteeriyada istrebtokoker oo leh maado/sun gaar ah taas oo keenta finanka. Wakhtiga inkubeeshanku waa 2-4 maalmood. Xanuunka ka dib ilmuu wuxu noqdaa mid aan qaadi karin mar kale.

**Is-daryeelib/daryeel caafimaad:** Waxa khafiifiya cabitaan qabow ama diiraan. Haddii baahi jirto xummad yareeyaha/xanuun yareeyaha (eeg Xummad, bogga 5). Caadi ahaan waxa lagu daweyyaan antibayootika. La xidhiidh rugta caafimaadka.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa inuu joogo guriga ilaa inta uu bilaa xummad noqonayo oo awodo ka qayb-qaadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannaanada. Haddii ilmaha la siyo antibayootik waa in daaweyntu socotay ugu yaraan laba maalmood oo ka horaysa ku noqoshada dugsiga xannaanada.

## Is-nidaamis

Is-nidaamisku wuxu keenaa cuncun xun oo caadi ahaan ka bilaabma cumaaacumta gacmaha, faraha dhexdooda iyo hareeraha meelaha maqaarku ka yahay khafiif iyo jileec. Waxay keentaa buurbuur casaan ah ama nabaro waxayna mararka qaarkood u egtahay cambaar. Is-nidaamis waa xayawaan yar, cayayaan kaas oo caabuq ku keena dadka oo keliya. Wuxu ku faafaa is-taabashada dhow ee u dhaxaysa dadka laakiin xitaa wuxu ku gudbaa dharka iyo gogosha sariirta halkas oo is-nidaamisku ku noolaan karo 2-3 maalmood. Faafinta ilaa inta cuncunku bilaabmayaa waxay qaadan kartaa 2-10 toddobaad.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Waxa lagu talinayaan baaritaan dhakhtar maadaama baaritaanka cudurkan adagayahay in la ogaado. Isku mar ayaa la daweeyaa qofka uu ku dhacay is-nidaamisku iyo inta kale ee qoyska/guriga. Dharka iyo gogosha sariirta waa la dhaqaa. Dwoooyin bilaa warqad dhakhtar ah ayaa yaala farmasiiga. Wakhti ayay qaadan kartaa ka hor intaan cuncunku baabi'in.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa inuu joogo guriga maalinta ugu horeysa ee daaweynta intaa kadibna wuxu ku noqon karaa dugsiga xannanada. Wargeli dugsiga xannanada maadaama loo baahan karo in la baarood caruurta kale iyo shaqaalah.

## Gooryaanka

Gooryaanku waa 10 mm dhererkisu waana khafiif sida dunta harqaanka oo waa mid caadi ah oo aan keenin khatar. Ilmaha waxa ku dhaca cuncun xun oo futada ah kaas oo u badan fidki iyo habeenki, markaasi oo gooryaanku banaanku u soo baxayo oo ukun dhigayo hareeraha afka malawadka qaybiitsa hoose. Badanaaba ukuntan gooryaanka ayaa caruurta ku soo celisa xanuunkan. Faafinta ilaa inta cuncunku ku bilaabmayaa waxay qaadan kartaa 3-7.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Waxa lagu daweeyaa dawooyinka bilaa warqad dhakhtar ah. Weydii farmasiiga. Ku hubso in ilmaha gacmihiisu nadiif yihiin oo ciddiyahana laga jarro. U qaad kastuumo nadiif ah maalin kasta oo si joogto ah u baddel gogosha sariirta. La xhdidh rugta daryeelka caruurta ama rugta caafimaadka haddii dhibaatadu aanay baabi'in.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu uma bahna joogista guriga inta ay socoto wakhtiga daaweyntu.

## Busbus/hablabaas

Busbus/hablabaas wuxu ku bilaabmaa xummad iyo nabaro/finan cuncun leh taas oo kadibna qallala. Faayraska busbuska/hablabaaska aad ayuu u faafaa. Waxa laga helaa xuubka sanka iyo dalqada waanu faafaa ka hor intaan la arag finanka. Wakhtiga inkubeeshanku waa 10-20 maal-mood. Badanaa waxa fican in qofka busbuska/hablabaaska ku dhaco da'da dugsiga xannanada marka la barbardhigo mar dambe oo nolosha ah. Infekshanka busbuska/hablabaaska ka dib wuxu faayrasku si nasasho ahaan ah ugu jiraa jidhka. Fururuca maqaarka waa dib-u-kicista faayraski gabobey ee busbuska/hablabaaska qofka waxaanu ku badanyahay dadka waayeelka ah. Busbuska/hablabaaska ma u faafo furuuraca maqaarka balse fururuca maqaarka ayaa ayaa u faafa busbus/hablabaas.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Qol qabow yar iyo qabowga ayaa khafiifiya cuncunka. Mararka qaarkood waa la siin karaa dawooyinka xummad yareeyaha/xanuun yareeyaha (eeg Xummad, bogga 5). Raadso rugta caafimaadka haddii finanku noqdaan kuwa qoyaan leh ama hareeraha ku leh casaan weyn taas oo calaamad u ah infekshan bakteeriya.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa in uu guriga joogaa ilaa inta uu bilaa xummad ahaanayo oo awoodayo ka qayb-qaadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannanada. Busbus/hablabaas aad ayuu u faafaa waxaanu faafaa isla markiiba ka hor intaan loo bukoon iyo ilaa inta ay nabaradu ku qallalayaan. Ma la joojin karo ku faafitaanka dugsiga xannanada iyada oo la adeegsanayo in ilmaha lagu hayo guriga.

## Indho xanuun

Xilliga indho xanuun waxay indhuuhu noqdaan casaan wawaanaa indhaha ku samaysma xab/dheecaan. Indho xanuunka waxa sababi kara faayras labadaba hargeeb, baakteeriya iyo xasaasiyad. Xilliga hargebka waxa caruurta qayb ka mid ah mareenada neefta ka gala faayraska hargebka haka qaar kalena uu kaga dhaco xitaa indhaha. Ilmaha waxa casaada indhaha oo geesyada indhaha ayuu ku yeeshaa wax yar oo xab/dheecaan ah hurdada ka dib. Waxay bilaa daawyn ku bogsataa hal toddobaad. Xilliga infekshanada bakteeriyyada ishu hurdada ka dib si gebi ahaan ah ayay isugu dhegtaa. Badanaaba waxa soo dareera xab/dheecaan adag xitaa marka ilmuu soo jeedo. Waxay ku bogsan kartaa dhaqida isha laakiin mararka qaarkood waxa loo baahan karaa ku daaweynta antibayootika. Xasaasiyadu waxay keentaa cuncun oo isha way casaataa isla markaana xabka/dheecaan kuna waa mid wax laga dhex arki karo oo adag.

**Is-daryeel/daryeel caafimaad:** Si nadiif ah isha ugu dhaq biyo caadi ah marar badan kolba sidi loogu baahdo. Iisticmaal maro jilicsan oo yar oo nabarada lagu duuubo ama cudbi oo dhaq geesyada isha ee gudaha iyo dibeddaa. Ka dib si fiican u dhaq gacmaha. Badanaaba baddel tuwaal-lada gacanta iyo galinka barkinta. La xidhiidh rugta caafimaadka haddii ilmuu dhib badan kala kulmo isha, xanuun ku leeyahay isha ama haddii infekshanku ku tegi waayo hal toddobaad.

**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu wuxuu joogi karaa dugsiga xannanada keliya haddii oo qudha xabka/dheecanka ishu yaryahay hurdada ka dib. Ilmuu waa inuu joogo guriga haddii ishu dheecamid leedahay, isku nabmayso oo ay tahay in la dhaqo dhown mar maalintiba.

## Indho xanuun iyo dhego xanuun

Xanuunka ku dhaca xuubka dhegaha waa nooc khafiif ah o oka mid ah dhego xanuun waxaanu ka bilaabmi karaa oo la xiriira faayras hargab. Dareere if-gudbiye ah ayaa ku samaysma xuubka dhegta ee maqalka qaabilسان waxayna dhegta ku keentaa dareen leh cadaadis iyo daboolnaan. Xilliga dhego xanuunka waxa dareeruhu noqdaa mid muddo dheer jira oo ilmaha sii weyn ayay u xanuuni kartaa dhetgu. Xummadi caadi ayay tahay.

**Is-daryeelid/daryeel caafimaad:** Kor u qaadita madaxyadda sariirta waxay yaraynaysaa bararka sanka iyo dhegta waxayna keentaa in xanuunku yaraado. Dwoooyinka xummad yareeyaha/xanuun yareeyaha waa haddii ay baahi jirto (eeg Xummadi, bogga 5). Xanuunka xuubka dhetgu wuxu ku bogsadaa bilaa daaweyn. Xitaa dhego xanuunku iskiis ayuu u bogsan karaa dhanka caruurta dugsiga xannaanada ee sida kale u caafimaad qaba. La xidhiidh rugta caafimaadka haddii ilmuu leeyahay xanuun dhegaha ah inkastoo la siiyay dwoooyinka xanuunka yareeyaa, xummad sarre ama haddii dheecaan ka dare-rayo dhetgu. Ma loo baahna in la raadiyo daryeel habeenki balse waa la sugi karaa ilaa maalinnimada dambe. Toos ula xidhiidh daryeelka caafimaadka haddii ilmuu taag daranyahay, aanu doonayn cabitaan, noqdo mid ka bararsan dhetgu dabadeeda ama adagytahay qortu.



**Joogitaan dugsiga xannanada mise guriga?** Ilmuu waa in uu guriga joogaa ilaa inta uu bilaa xummadi ahaanayo oo awoodayo ka qayb-qaadashada hawlaha caadiga ah ee dugsiga xannaanada.



Utgiven av Smittskydd Skåne

7:e upplagan, juni 2012

Broschyren kan laddas ner samt beställas på [www.skane.se/smittskydd](http://www.skane.se/smittskydd)

Layout & original: Ann-Christin Jönsson

Omslagsbild: colourbox.com

Tryckeri: Danagård Litho, Ödeshög